SOMALI

Tayooyinka Howlaha Macmiilka
Customer Service Standards

Maareynta Ijaarka –
Tenancy Management

1. Marka aad ijaar saxiixeysid guri cusub, waxaan ku siineynaa bug-gacmeedka ijaartaha oo ay ku qoran tahay howlaha iyo tayooyinka aad naga filan karto.

2. Waxaan kugu soo booqan doonnaa gurigaada cusub 28 maalmood gudahooda marka aad u guurto si aan u hubinno in wax walba ay kuu hagaagsan yihiin iyo si aan kuugu hibeyno kaalmo iyo talo. Haddii aad tahay ijaarte-isbarasho waxaan ku soo booqan doonnaa laba mar sannadka hore ee ijaarkaada.

3. Waxaan ku soo wargelin doonnaa go'aan kasta loogu beddelaayo ijaarka is-barashada mid ijaar la hubo 10 maalmood ka hor inta uu dhammaan sannadka hore.

4. Waxaan tixgelin doonnaa su'aalo kastoo aad qabto ee ku saabsan ijaarkaada 1 maalin gudaheed waxaanna aan si buuxda kuugu soo jawaabi doonnaa 10 maalin shaqeed.

5. Waxaan kuugu soo jawaabeynaa si degdeg ah marka aad dooneysid inaad isbeddel ku sameysid ijaarkaada annagoo:

- kuu soo direyna foomamka lagama-maarmaanka ah 48 saac gudahood
- ka shaqeyneyna codsiyada 20 maalmaha shaqada gudahooda marka la helo foomkaada
- ku siineyna go'aankeenna oo qoraal ah 10 maalmaha shaqada gudahooda.

6. Waxaan ku soo booqan doonnaa dabayaaqada ijaarkaada waxaanna kaala munaaqashoon doonnaa qorshaha dhammeynta ijaarkaada, ay ku jirto kaala talin tallaabo kastoo aad u baahan tahay inaad qaaddo.

Maareynta Dakhliga Income Management

1. Waxaan ku siin doonnaa ogeysiin 4 usbuuc oo qoraal ah haddii uu jiro

kordhin ijaarka.

2. Waxaan kuu soo diri doonnaa qoraal ijaarka ku saabsan ugu yaraan 4 jeer sannadkii oo ah habka aad doorbidday.

3. Waxaan ku siin doonnaa doorasho iyo dalbasho kala duwan ee lacag-bixinta taasoo kuu suuragelineysa inaad ijaarkaada ku dhiibto 24 saac maalintii, 365 maalmood sanndkii.

Waxaan ku soo booqan doonnaa
4 usbuuc gudahooda marka ijaarkaada billowdo si aan kaala munaaqashoonno dhiibidda ijaarkaada kuuna siinno talo iyo akhbaar.

5. marka aad saxiixdo ijaarkaada, waxaan kuu sheegi doonnaa akhbaarta ku saabsan inta ijaar ee aad dhiibeysao usbuuc walba, sida iyo meesha aad ka bixin karto iyo sida aan kuu caawinno karno.

6. Waxaan si degdeg ah kuugu soo diro doonnaa warqad si aan kuu siinno caawin iyo talo haddii laguugu leeyahay 2 usbuuc oo ijaar ah aadna tahay lacag- bixiye usbuuc walba ama haddii laguugu leeyahay 5 usbuuc adigana aad lacagta bishii bixiso.

7. Waxaan cabbiri doonnaa raalli ku ahaanshahaada howlaha ay kuu qabato kooxda Maareynta Dakhliga ugu yaraan laba mar sannadkii.

Guryeynta La-taakuleeyey
Supported Housing

1. Waan ku soo booqan doonnaa si aan u qiimeyno baahida kaalmadaada aanna ku siinno talo 28 maalmood gudahooda marka la helo soo gudbintaada.
2. Waxaan ku soo booqan doonnaa 4 jeer sannadkii iyadoo uu goobjoog yahay taakulo- bixiyahaada si loo kormeero lana cusbooneysiiyo isbeddelka baahidaada
3. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshahaada howlaha aad ka hesho
   kooxda Taakuleynta Guryeynta iyo taakulo bixiyahaada la cayiman.

Tas-hiilaad iyo Daryeelka Macmiilka Access and Customer Care
Waxaan u maareyn doonnaa su'aalaha oo dhan si degdeg ah, akhlaaq iyo karti leh kuuna xaqiijinno tayada howsheenna annagoo hiigsaneyna inaan:

- gaarno 90% guud ahaan raalli ahaanshaha macmiilka ee tashiilaadka u leh hey'adda
- 90% macmiisheenna ay ka warbixiyeen inaan arrintooda u maareyno si akhlaaq iyo xushmad leh

- maareyno 80% ee su'aalaha marka ugu horreyso ee barta xiriirka
- ugu jawaabno 80% taleefannada 20 sakan
- maareyno 90% su'aalaha weji ka weji 15 daqiiqo gudahood marka ay yimaadaan xarunta One Stop Centre
- qirno 90% waraaqaha iyo su'aalaha internetka (electronic) hal maalin-shaqeed gudaheeda
- ugu jawaabno si buuxda ilaa 80% waraaqaha iyo internetka (electronic) 10 maalmaha shaqada gudahooda
- u hubinnaa 90% howlaheenna in ay gaarsiisan yihiin heererka dukaameysiga cajaa'ibka (mystery shopping standards).

Dhaqanka Akhlaaqda-Xun- Anti-Social Behaviour

1. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa 1 maalin maalmaha shaqada warbixintaada ku saabsan kiisaska aadka u culus ay ku jiraan dhacdooyinka dhab ama handadaad, carqalad-jireed.
2. Waxaan kula soo xiriir doonnaa 3 maalin shaqeed gudahooda waxyaabaha ku saabsan arrimaha akhlaaqda-xun ee kale.
3. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa ugu yaraan 28 maalmood walba si aan kuula socodsiinno arrimaha cusub ee xaaladdaada.
4. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa mar kale 28 maalmood gudahooda ee xiritaanka kiiskaada.
5. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa 1 maalin shaqeed gudaheed ee soo tebinta cabashadaada annagoo kaala soo xiriireyna hey'adda soo-tebinta 24-ka saac.
6. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa 1 maalin shaqeed gudaheeda ee soo tebinta cabashadaada aad ku soo gudbisay websaydkeenna (our website).
7. Waxaan u soo bandhigi doonnaa howlo dhexdhexaadin ah macmiisheenna oo dhan marka ay habboon tahay

Carqalad Guri- Domestic Violence

1. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa 1 maalin shaqeed gudaheeda ee soo

tebintaada dhacdo carqalad guri.

2. Waxaan kula soio xiriiri doonnaa ugu yaraan 28 maalmood walba si aan kuu siinno akhbaarta cusub ee xaaladdaada.
3. Xaaladaha cusul waxaan qaadi doonnaa tallaabo degdeg ah si aan u badbaadinno dhibbanaha.
4. Waxaan xushmeyn doonnaa xaqa xogtaada ee kiiska carqaladda gurigaada mana kala hadli doonno tafaasiisha kiiskaada cid kale annagoo aan kaa helin oggolaansho qoraal ah
5. Waxaan indhaha ku haayn doonnaa raalli ku ahaanshadaada howsha aan qabannay iyo natiijada cabashadaada waanna daabici doonnaa natiijooyinka lixdii bil walba.

Ku- Meeleynta iyo Guryaha Bannaan- Empty Homes and Allocations

1. Waxaan dayac tiri doonnaa guryaha bannaan waxaanna u diyaarin doonnaa in dib loo ijaaro 32 maalmood gudahooda.

2. Waxaan hubin doonnaa in gurigaada cusub uu gaarsiisan yahay Heerkeenna Guryaha Bannaan ka hor inta aad aqbalin ijaarkaada cusub.

3. Waxaan ku casumi doonnaa Kormeerayaasha Ijaarkeenna in ay si dhab u u xaqiijiyaan qeybo ka mid ah guryaheenna bannaan bil walba.

4. Waxaan diiwaangelin doonnaa foomamka codsiga Diiwaanka Guryeynta Leeds 10 maalmaha shaqada gudahooda.

5. Waxaan kuu soo bandhigi doonnaa muuqaal la socda nuqulka gurigaada cusub.

6. Waxaan cabbiri doonnaa raalli ku ahaanshahaada howsha ay kuu qabanaayaan kooxda Ku-meeleynta iyo Guryaha Bannaan (Empty Homes and Allocations team).

Maareynta Hantida Ma-Guurtada- Estate Management

1. Waxaan cabbiri doonnaa raalli ku ahaanshahaada hey'adda maareynta hantida ma-guurtada iyo deegaanka sannadkiiba laba mar waxaanna u qasdeynaa inaan gaarno 90% raalli ahaansho

2. Waxaan u qasdi doonnaa in hantideenna ma-guurtada ay gaarto 90% heerka ugu sarreeya aanna faafinno sida hantidaada ma-guurtada loo qiimeeyey warsida macmiilka iyo websaydka.

3. Waxaan jari doonnaa faafka iyo nawaaxiga cagaaran ee la wadaago ugu yaraan bishiiba mar xilliga jaridda marka cimilada ay noo oggolaato.

4. Waxaan nadiifin doonnaa nawaaxiga la wadaago ee falaatyada iyo guryaha gaagaaban ugu yaraan hal mar usbuucii.

5. Waxaan furi doonnaa qolka qashinka 1 maalin shaqeed gudaheeda marka la soo sheego.

6. Waxaan nadiifin doonnaa daaqadaha/dariishadaha la wadaago ee falaatyada dabaqyada badan hal mar sannadki, 3 bil ee walbana mashruucyada guryeynta iyo lixdii billoodba falaatyada gaagaaban.

7. Kooxdeenna caabboon ayaa baabi'in doonta qoraalka/sawirrada ku saabsan faquuqa, xayeysiin-galmo, muuqaallada aan habbooneyn iyo qoraalka aflagaadada 4 maalin shaqeed gudahooda.

8. Waxaan qaadi doonnaa qashinka sharci darrada jidka loo dhigo 1 maalin shaqeed gudaheed haddii la soo sheego.

Guryaha Degdegga ah- Sheltered Housing

1. Waxaan ku siin doonnaa muuqaal gurigaada cusub oo la socoda buugga xayeysiinta.

2. Waxaan kaa caawin doonnaa inaan sugno nabadgelyadaada iyo badbaadadaada annagoo ku siin donna tas-hiilaad ciyaha xannaanada ee alaarmiga leh.

3. Waxaan ku siin doonnaa tas-hiilaad kaalmo qof-il-ku-haye ah waxaanna cabbiri doonnaa raalli ku ahaanshahaada howsha laguu qabtay.

4. Waxaan ka shaqeyn doonnaa inaan caawinno dadka laciifka ah si aan u weyneyno awooddooda in ay ku noolaadaan nolol madaxbannaan.

5. Waxaan ku siin doonnaa fursad aad ku sameysid kormeer wadajir ah

ee gudaha iyo dibadda daartaada aadna noo sheegto wixii walaac ah ee aad qabto.

Ijaartaha- Leaseholder

1. Waxaan kaala tashan doonnaa dayactir kastoo aad u weyn ama hagaajin ee aan qorsheyneyno inaan ku sameyno daarta aad ku nooshahay aanna kuu sharraxno doorashooyinkaada lacag-bixinta.

2. Waxaan kuu qiri doonnaa helitaanka codsi dhaafid

mucaahado ku jirta ballanka ijaarka 10 maalmood gudahooda

3. Waxaan qiri doonnaa helitaanka su'aalahaada muddo 1 maalin waxaanna si buuxda kuugu soo jawaabi doonnaa 10 maalmood gudahooda.

4. Waxaan qiri doonnaa helitaanka cabashooyinkaada 1 maalin gudaheed waxaan si buuxda kuugu soo jawaabi doonnaa 10 maalin shaqeed gudahooda.

5. Waxaan u qaban doonnaa ugu yaraan laba kulan ijaartayaasha sannad walba waxaanna kuu soo bandhigi doonnaa habab kala duwan ee aad uga qeyb qaadan kartid qaabeynta hagaajinta howlaha.

6. Waxaan qaban doonnaa ugu yaraan 2 Guddi Tijaabo Macmiil (Customer Sounding Boards) sannadkii.

7. Waxaan kuugu soo booqan doonnaa gurigaada markaad dhammeystirtid habka noqoshada ijaarte, si aan kuu siinno Buug-Gacmeedka Ijaartaha kaasoo sharxaaya ijaarkaada, xuquuqdaada iyo mas'uuliyadahaada.

8.Waxaan ku siin doonnaa caddeynta sannadlaha ka hor 1 Oktoobar iyadoo laguugu dallacaayo lacagta baxday, la-talinta lacagta nusqaanka ah ama lacagta saa'idka ah.

9. Waxaan ijaartayaasha u bandhigi doonnaa habab kala duwan ee lacag bixinta.

10. Waxaan si joogta ah u soo saari doonnaa warsidayaasha ijaartaha.

11. Waxaan mar walba kula socodsiin doonnaa sida aan howlaha u soo bandhignay ee Tayooyinka Howlaha.

12. Waxaan kula soo xiriiri doonnaa 1 maalin shaqeed gudaheeda ee warbixintaada ku aaddan kiisas aad u culus ee Akhlaaq-Xumida Bulshada ay ku jirto carqalad dhab ah ama mid handadaad ah waxaanna kula soo xiriiri doonnaa 5 maalin shaqeed gudahooda waxyaabaha kale ee Akhlaaq-Xumida Bulshada .

13. Waxaan ku siin doonnaa qiyaasta dallacaadda howsha 4 usbuuc oo horumaris ah ee sannad xisaabeedka imaan doona; waxaanna kuu xaqiijin doonnaa kharashka dhabta ah ka hor 1da Oktoobar.

14. Haddii aad lacag saa'id ah ka dhiibtay xisaabta kharashka howlahaada waxaan lacagta saa'idka kuugu soo celin doonnaa 10 maalmaha shaqada gudahooda ee caddeyn sannadlaha marka la soo saaro.

Ku-Milnaanshaha Macmiilka- Customer Involvement

1. Waxaan kuu soo bandhigi doonnaa habab kala geddisan si aad u noqoto mid ku millan aanna ku faafinno kuwaan xayeysiinteenna Ku-Milnaanshaha Macmiilka, kuwaasoo aan u xayeysiinno macmiisheenna.

2. Waxaan bixin doonnaa tababar ah mid saaxiibtinimo iyo taakuleyn si aan kaaga caawinno si aad noogu milnaatid ama aad ugu milnaatid bulshadaada.

3. Waxaan isticmaali doonnaa goob si fudud lagu heli karo, kuu keeni doonnaa tajubaanno kaana caawin doonnaa gaadiidka iyo kharashka xannaanada carruurta ama kharashka daryeelaha

4. Waxaan rubac kasta faafin doonnaa tusaalooyin ah sida ku milnaanshaha macmiilka ay wax uga bedeli karto websaydkeenna iyo warsidaha macmiilka 'The Buzz'.

5. Waxaan ku cabbiri doonnaa habka aan howsha u sooo bandhigno goolashii la isku raacay natiijadana waxaan faafineynaa rubac walba. Kuwaan waxaa ku jira:

- Boqolkii inta guri ee Guddiga Degmada ay matasho hey'adda Tenant and Resident Association ama Matalayaasha nawaaxiiga (Area Representative)

- Boqolkii inta ijaarte ee raalliga ka ah fursadahooda si ay uga qeyb-galaan
- Boqolkii inta ijaarte ee raalliga ka ah in fikraddooda la tixgeliyey
- Cadadka macmiilayaasha ka qeyb galeya tababar.

Cabashooyin- Complaints

1. Waxaan ka dhigi doonnaa habka soo gudbinta cabashada mid sahlan.

2. Waxaan ku soo jawaabi doonnaa 1 maalin shaqeed marka aad noo soo dirto cabasho, waxaanna jawaabteenna ku dari doonnaa qofka ka mas'uulka ah wax ka qabadkeeda.

3. Waxaan baari doonnaa cabashooyinka oo dhan si buuxda oo degdeg ah oo ay la jirto xalkii la isku raacay 10 maalin marka aan helno cabashada.

4. Waxaan u shaqeyn doonnaa si adag si aan u xallinno cabashooyinka si ay raalli ka yihiin macmiisha waxaanna ka qeyb gelin doonnaa ijaartayaasha xukminta cabashooyinka kuwaasoo gaara heerka 3aad ee habkeenna cabashooyinka.

Tayooyinka Hey'adda Maalgelinta-
Property Investment Service Standards

Ka Jawaabid Dayactir- Responsive Repairs

1. Waxaan kuugu soo jawaabi doonnaa si degdeg ah marka dayactir degdeg ah na loo soo tebiyo, annagoo goobta tegeynaa 3 saacadood gudahooda. Haddii daytactirka loo dhammeyn karin si degdeg ah, waxaan shaqada dhammeyneynaa maalinta xigta.

2. Waxaan si degdeg ah u maareyneynaa dayactirrada degdegga ah ee

na loo soo tebiyo waxaanna shaqada dhammeyneynaa 3 maalin shaqeed 98%.

3. Waxaan dhammeyn doonnaa dayactirrada aan degdegga ahayn ee na loo soo tebiyo 20 maalin shaqeed

4. Marka ay tahay inaan booqanno si aan horey ugu kormeerno ka hor inta aan oggolaan in dayactirka la dhammeeyo, waxaan tegi doonnaa 8 maalin shaqeed.

5. Waxaan isku raaci doonnaa waqti ballan ee kuu habboon, waxaanna kuugu xaqiijineynaa qoraal ahaan ballantana xafidi doonnaa.

6. Waxaan taleefan kuugu soo wici doonnaa maalinta ballanta haddii aan haayno tafaasiisha xiriirkaada, si aan kuugu xaqiijinno waqtiga aan fileyno inaan imaadno.

7. Haddii aan haayno tafaasiil, waxaan tekst u direynaa macmiisha ka hor waqtiga ballanta si aan u xasuusinno inaan soo booqaneyno.

8. Waxaan u dhammeyneynaa dayactirrada oo dhan si habboon oo wacan, nadaafadeyneyna howsha ka dib ugna tegeynaa howsha si nidaamsan. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshaha macmiilka howsha dayactirka bil walba. Macmiisha oo dhan ee dayactir soo sheegatay waxay lahaan doonaan fursad ay ku soo celiyaan su'aalo ku saabsan raali ahaanshaha.

9. Waxaan ula dhaqmi doonnaa macaamiisheenna oo dhan iyo guryahooda si xushmad iyo qaddarin leh, waxaanna u dhaqmeynaa sida dadka khubaro ah mar walbana waxaan tuseynaa kaarar aqoonsi marka aan guryaha booqaneyno.

10. Qandaraaslayaasheenna waxay u lebbisan doonaan si habboon si ay u sameeyaan shaqada laga sugaayo waxayna xeran doonaan lebbiska shirkadda.

Bedelidda- Adaptations

1. Iyadoo ay ku xeran tahay nooca shaqada loo baahan yahay, waxaan dhammeyn doonnaa isbedellada yar-yar 7 ama 28

maalmo shaqeed marka macmiisha ay noo soo sheegaan.

2. Waxaan qoraal ahaan kuugu soo sheegi doonnaa 5 maalmaha shaqada gudahooda in talo ku saabsan isbeddello waaweyn in laga helay Tarabiiste Xirfadle ah (Occupational Therapist).

3. Waxaan kuu sheegi doonnaa go'aankeenna ku saabsan isbedellada waaweyn 25 maalmo-shaqeed gudahooda ee Tarabiiste Xirfadle. Haddii shaqadu tahay mid aan macquul ahayn ama habbooneyn, waan sharxi doonnaa waxaanna xaqiijin doonnaa sababaha iyagoo qoraal ah waxaanna dooni doonnaa doorashooyin guryeyn kale.

4. Waxaan dhammeyn doonnaa isbedellada waaweyn oo dhan, iyagoo ku xiran mudnaanta, waqtii loogu talo galay marka talooyin laga helo Tarabiiste Xirfadle.

Mudnaanta 1 Mudnaan isbeddel sare **74 maalmaha kalandarka**
Mudnaanta 2 Mudnaan isbeddel dhexdhexaad **127 maalmaha kalandarka**
Mudnaanta 3 Mudnaan isbeddel hoose **220 maalmaha kalandarka**

5. Waxaan hubin doonnaa in shaqada loo qabtay si nabad ku jirto gurigaadana looga tegay isagoo nadiif ah dhammaadka maalin walba.

6. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshaha macmiilka isbeddellada yare ee lagu sameeyey macmiilka gurigiisa.

7. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshaha macmiilka isbeddellada waaweyn ee lagu sameeyey macmiilka gurigiisa.

Asbestos- Asbestos

1. Waxaan qoraal kuugu ogeysiin doonnaa 2 maalo-shaqeed gudahooda ee helitaankeenna soo gudbinee su'aalo ee asbestos sharxaaya sababta su'aalaha loogu baahan yahay waxaanna ku siin doonnaa tafaasiisheenna xiriirka haddii aad qabtid su'aallo ama walaac.

2. Waxaan dhammeyn doonnaa soona celin doonnaa warbixinnada su'aalaha 5 malomo-shaqeed gudahooda laga billaabo helitaanka soo tebinnada.

3. Waxaan qoraal ahaan kuugu wargelin doonnaa marka soo tebin ka saarid asbestos la helay 2 maalmood waxaanna ku siin doonnaatafaasiisha xiriirka ee qandaraaslayaasheenna iyo koobi xayeysiinteenna akhbaarta (Asbestos Information Leaflet).

4. Waxaan dhammeyn doonnaa qaadidda asbestos 17 maalmo shaqeed gudahooda, annagoo isticmaaleyna qandaraaslayaal shati leh.

5. Haddii dayactirku yahay mid degdega ah, waxaan tijaabineynaa qeybo ka mid walaxda 24 saac gudahooda.

Howlgelinta Gaaska- Gas Servicing

1.Waxaan hubin doonnaa badbaadada gurigaada annagoo sameyneyna hubsiimo badbaado ee aaladaha iyo qalabka loo isticmaalo gaaska 12 biloodba iyadoo ay taa sameyn doonaan Injineerada diiwaangashan ee Gas Safe.

2. Waxaan kuu soo diri doonnaa kaar sannadle ah ugu yaraan 8 usbuuce ka hor inta kan shaqeynaaya hadda uusan dhicin iyadoo ku xasuusineysa in howsha gaaska sannadlaha ay soo dhawdahay.

3. Waxaan kuugu ogeysiin doonnaa warqad ugu yaraan hal bil hor marka qalabka iyo shaqada tubooyinka gaaska ay gurigaada ku soo began tahay iyadoo ah howsha/tijaabada sannadlaha. Waxaan ku siin doonnaa tafaasiisha qandaraaslaha haddii aad u baahatid inaad arrintaanmar kale oo munaasab kuu ah aad ka dhigato.

4. Waxaan imaan doonnaa maalinta iyo waqtigii la isku raacay.

5. Waxaan dhammeyn doonnaa howsha iyo dayactirrada lagama-maarmaanka ah waxaanna ku siin doonnaa koobi shahaadada CP12 ee badbaadada gaaska 20 maalmo-shaqeed gudahooda.

6. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshaha macmiilka ee howlaha badbaadada iyo dayactire gaaska aan sameynay.

7. Waxaan sameyn doonnaa u kuugalid tayo si aan u hubinno in aaladaha gaaska la tijaabiyey ayna waafaqsan yihiin Qawaaniinta Gaaska ee hadda jira

Wanaajinta Guryaha- Improving Homes

1. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshahaada qeybta macmiilkeenna qaabilsan (customer service).
2. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshahaada alaabta aan kuu keennay.
3. Waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshahaada hab-dhaqanka, akhlaaqda iyo mowqifka qofka shaqaalaheenna ah.
4. Waxaan cabbiri doonnaa raalli ku ahaanshahaada xiriirkeenna inta shaqada billaaban.
5. Waxaan cabbiri doonnaa raalli ku ahaanshahaada xiriirkeenna inta shaqada socoto.
6. Haddii ay macquul tahay waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshahaada la-tashiga naqshadda.
7. Haddii ay macquul tahay waxaan cabbiri doonnaa ku raalli ahaanshahaad doorashooyinka kala duwan ee shaqa-dhammaadka cutubyada, daboollada saqafka iyo albaabada.
8. Waxaan faafin doonnaa shaqooyinka waaweyn ee la qaban doono sannadkii.

Howlgelinta Wiishka (Lift)- Lift servicing

1. Waxaan ku siin doonnaa 24 saac, 7 maalmood usbuucii ee shaqo degdeg ee wiishka.
2. Waxaan sameyn doonnaa hubin badbaado dayctir sannale ah iyo kormeerid qalabka wiishka guryaha.
3. Waxaan imaan doonnaa haddii wiishka hallaabo 1 saac gudaheeda marka nal soo ogeysiiyo in qof ku xirmay wiishka.
4. Waxaan wiishka ka shaqeyn doonnaa 10 jeer sannadkii, waxaan kaloo aan sameynaa 2 hubsiimmo badbaado sannadkii iyadoo

uu sameynaayo khabiir sumcad leh.

5. Waxaan u imaan doonnaa halowga wiisha 2 saac gudahooda waxaanna wiisha sameyneynaa 24 sacc gudahooda.
6. Waxaan ku siin doonnaa ogeysiin horumarin ah ee ah ku saabsan waqti wiishka uu shaqeyneynin tusaale ahaan marka lagu sameynaayo dayactirka caadiga ah waxaan tan ka cabbiri doonnaa annagoo weydiineyna su'aal cayiman ee su'aalaha raali ahaanshaha.
7. Waxaan cabbiri doonnaa raalli ahaanshahaada guud ee howsha wiishka ugu yaraan laba jeer sannadkii.

Badbaadada dabka- Fire Safety

Badbaadadaada waa muhiimaddeenna koowaad waxaanna tallaabo ka qaadeynaa si aan u hubinno in guryahoo dhan ee la wadaago ama Ytas-hiilaadka la wadaago ay waafaqsan yihiin shuruucda badbaadada dabka.
Waxaan:

- sameyn doonnaa qiimeyn khatarta dabka ee nawaaxigeenna la-wadaago 14 bilood gudahood
- tallaabo ka qaadeynaa ogaanshaha degdegta 24 saac gudahood marka la ogaado
- ka soo warbixin doonnaa waxyaabaha muhiimka ah ee aan ogaannay, shaqadana waan dhammeyneynaa si aan u ansixinno 7 maalmo-shaqeed gudahood
- tallaabo ka qaadi doonnaa waxyaabaha kaloo aan ogaanno 28 maalmood marka la ogaaday.